SOMALI

Yuu waxyeeleeyey duufaan, daaddad ama dabka keymaha? Caawimaad ma u baahan tahay?

Affected by storm, flood or bushfire? Need help?

ADEEGYADAKA SOO KABASHADA MASIIBADA

CAAWIMAAD WAA LA HELAYAA



Masiibooyinka sida dabka keymaha, daaddadka, duufaanada ama dhulgariirka waa wax dhici kara wakhti kasta.

Warqadan yari waxay sharxeysaa:

- Wixii aad sameyn laheyd marka masiibo ay Soo dhowdahay
- Caawimaada aad heli karto markay masiibo dhacdo

Xarunta Ka soo kabashada Masiibada ee Dawlad Goboleedka DoCS
(8855 5111) • 1800 018 444

WAXAY SAMEYSO DoCS

Bixinta Adeegyada Ka soo kabashada Masiibada waa masuuliyada Wasaaradda Adeegyada Bulshada ee NSW (DoCS) oo hoos timaada Qorshaha Masiimada Dawlad Goboleedka.

Tan waxaa ka mid ah caawinta dhibanayaashu si ay noloshooda dib ugu soo ceshadaan iyadoo la siinayo cunto, hoy, dhar, tallo, hagid, iyo taageero shakhsiyeed iyo lacageedba.

DoCS waxay isku xirtaa wakaalado badan oo aan dawlada ka tirsaneyn oo caawimo ka geysta bixinta adeegyadan qaarkood. Kuwan waxaa ka mid ah Laanqeyrta Cas, Salvation Army, St Vincent de Paul Society, ADRA (Wakaalada Samafalka iyo Horumarinta Dhibka) iyo Anglicare.

Waxaan si aad ah ula shaqeynaa dhammaan adeegyada Gargaarka degdega ah marka loo baahdana waxaan sameynaa oo maamulnaa Xarumaha Ka soo bixida Xaaladaha qaarkood waxay ku caawin doonaan dhibanayaasha guryahooda waxyeeladu soo gaartay.

DoCS waxay sidoo kale isku xirtaa wejiga ka soo kabashada wakhtiga dheer ee hawlgalka gargaarka degdega ah waxaana laga yaabaa inay sameyso Xarumo Kasoo kabasho oo ujeedadan loo sameeyey. Xarunta Ka soo kabashada waxaa loogu talagalay inay siiso dhibanayaasha dhammaan caawimaada iyo macluumaadka ay u baahan yihiin. Tan waxaa ka mid ah taageero lacageed, ceymis iyo tallo dhismeed, iyo adeegyada turjubaanka

Maareeyayaasha Ka soo kabashada Masiibada ee Goboleed waa la sheegaa NSW oo dhan si loogu caawiyo inay bixiyaan oo ay xiriiriyaan adeegyada. Waxay sidoo kale horumariyaan oo ay dhaqan geliyaan Qorshayaasha Ka soo kabashada Masiibada Gobolka gudihiisa ah.

GOOBAHA MASUULIYADA

Wasaaradda Bulshada ee NSW (DoCS) waxay xiriirisaa adeegyada si loo hubiyo inay dadku helaan caawimaada ay u baahan yihiin inta lagu jiro iyo isla markiiba masiibada ka dib, iyo sidoo kale heerka ka soo kabashada inta lagu jiro. Waxaan bixinaa cuanto, hoy iyo dhar iyo sidoo kale caawimaad lacageed oo la siinayo dhibanayaasha si looga caawiyo inay guryahooda ka dhigaan kuwo ammaan ah oo lagu noolaan karo.

DoCS waxay sidoo kale isku xirtaa wakaaladahan muhiimka ah ee aan dawliga ah ee bixiya adeegyada samafalka:

DoCS
NSW Department of Community Services

ADRA
(Wakaalada Samafalka iyo Horumarinta dhibaatada)

Hoyga Gargaarka degdega ah

Waxay siiyaan hoy ku meelgaar ah iyo guri dadka guriga la' markay dhacdo masiibadu

---

Salvation Army

Cunto siinta

Waxay isku xiraan cuntooyinka goobta yaal iyo xarumaha Ka soo kabashada iyo Daad gureynta ee loogu talagalay dhibanayaalka, shaqaalaha ka soo kabashada iyo badbaadinta ee iskaaga ah iyo mar marka qaarkood, shaqaalaha gargaarka degdega ah ee mushaariga ah

---

Laanqeyrta Cas ee Awstareeliya

Taageero shakhsiyeed

Waxay bixisaa daryeel iyo u raaxeynta dhibanayaasha ku jira xarumaha daadgureynta iyo caawimaada dhibanayaasha u baahan caawimada

---

Anglicare

Taageerada Guud

Waxay ka caawisaa shaqooyinka khaaska ah ama adeegyada sida ay u garatey DoCS

St Vincent
de Paul Society

Qalab iyo baahida shakhsiyeed

Waxay bixineysaa alaabta shaskhsiyeed ee muhiimka ah si ay u caawiyaan dhibanayaasha sida Dharka, bustayaasha, Alaabta ilmaha yar lagu jiifiyo, shukumaanada, alaabta musuqusha, kabo, furaashyo, barkimooyin, sariiro iyo alaabta guryaha.

Adeega Turjumaada Taleefanka

Oo la heli karo 24 saac

131 450

ADEEGYADA KA SOO KABASHADA MASIIBADA

Gargaarka degdega ah ee DoCS waxay sameysaa oo ay maamushaa **Xarumaha Daadgureynta.** Shaqaalaha xarumahan waxay ka caawiyaan dhibanayaasha baahidooda ugu daran:

- cunto
- dhar
- hoy
- Caawimaad lacageed

DoCS waxay sidoo kale isku xirtaa wejiga ka soo kabashada wakhtiga dheer ee hawlgalka gargaarka degdega ah waxaana laga yaabaa inay sameyso **Xarumo Ka soo kabasho** oo ujeedadan loo sameeyey.

Xarumaha Ka soo kabashadu waxay bixiyaan:

- Macluumaad samafal
- Caawimaada lacageed ee degdega ah
- Adeegyo la talineed iyo sii gudbin loo qabto dhibanayaasha
- Taageero shakhsiyeed
- Hoy ku meel gaar ah
- Caawimaad lacageed oo la siinayo dhibanayaasha si ay uga caawiso dib u sameynta guryahooda.

DoCS waxay isku xirtaa oo kala shaqeysaa adeegyada ka soo kabashada wakaalado kale(caafimaadka, la talinta, turjumaada, guriyeynta iwm) oo laga yaabo sidoo kale inay ku yaaliin Xarunta Ka soo kabashada. DoCS waxay sidoo kale maamushaa Sanduuqa Safamalka Masiibada Bulshada. Sanduuqani wuxuu isu geeyaa lacagta lagu soo ururiyey dadweynaha waxayna hubisaa in si cadaalad ah loogu qaybiyey dhibanayaasha masiibada.

TUSAHA DAADGUREYNTA

Haddii masiibo laga yaabo inay ku soo food leedahay gurigaaga waxaa suurto gal ah in lagula taliyo inay kaa daadgureyso gurigaaga adeeg gaargaar deg dega sida Boliiska, Adeega Gargaarka Degdega ah ee Dawlad Goboleedka (SES) ama Adeegyada Dabdemiska.

Ka hor intaadan tegin, ogeysii saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah meeshaad u socoto. Xasuusi deriskaaga (gaar ahaan haddii ay da'yihiin ama tamar daran yihiin daadgureynta wax ku saabsan. Hubi inaad xirtid gurigaaga hubina in qofkastaa oo gurigiina degeni kula joogo.

Haddii aad ka baxdo gurigaaga ka feker qaadashada waxan soo socda:

- Wixii daawo ah/ qoraallo daawo/dawada neefta
- Ookiyaalahaaga, qalabka maqalka kordhiya iyo ilkahaaga dad sameega ah
- Neebiyada iyo caanaha loo qasho ilmaha dhashay
- Waraaqaha muhiimka ah sida baasaboorka/lacag/warqada dhalashada/waraaqaha caymiska/buugta bangiga, iyo sidoo kale sawiro iyo wixii xusuus ah
- Alaabta hurdada ee mudud muhiimkana ah iyo dhar ugu yaraan habeen wax loogu talagalay
- Qaar ka mid ah cuntooyinka aan xumaan iyo dhalooyin biyo ah – oo kugu filnaan kara ilaa 12 saac
- Xayawaanka aad korsato.

Xasuuso ...haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad noloshaada caadi ugu soo noqoto ka dib markay dhacday masiibo dabiici ah, waxaan u joognaa halkan si aan kuu caawino.

Xarunta Ka soo kabashada Masiibada Dawlad Goboleedka
(02) 8855 5111 • 1800 018 444

Haddii aadan ku hadli Karin Ingiriis, waxaan leenahay adeega turjumaada taleefanka ee 131 450

ISBN 0 7310 4347 2
December 2005